



## Waaxda Booliiska Minneapolis Buugga Xeerka iyo Nidaamka Booliiska

Lambar:  
5-300

### **Mujalladda shanaad - Xeerka Anshaxa ivo Isticmaalka Xoogga**

#### **Isticmaalka xoogga**

#### **5-310      Doorashada Xakamaynta - Saamaynta Hubka**

(xx/xx/23)

Dib u eegis lagu sameeyay xeerarkii hore: (08/17/07) (10/01/10) (09/08/20) (12/22/20)  
(04/04/21)

#### **I.    Ujeedo**

Ujeedada xeerkan ayaa ah in la ballaariyo shuruudaha xeerarka kale ee xoogga, gaar ahaan kuwa la xiriira xiriira wax yeelada la oggol yahay ee hubka iyo waxyeelada hubka la hagaajiyay.

#### **II.    Qeexitaano**

Erayada lagu qeexay P&P 5-304:

- Qaadis
- Geyn
- Ridista
- Muujin
- Ku howlan la beegsadaha
- Ku taagis
- Isticmaal

#### **III.    Xeer**

##### **A. Xeerka iyo Mabaadi'da Hagidda**

Marka lagu daro u gaar ahaanshaha xeerkan, shaqaaluhu waa inay raacaan shuruudaha dhammaan xeerarka kale ee khuseeya, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, Mabaadi'da Hagidda iyo heerarka kale ee P&P 5-301.

##### **B. Saamaynta hubka ee awood aan wax dileyn**

Saamaynta hubka ee MPD ay ansixisay (P&P 3-200) waxaa guud ahaan loo arkaa noocyada xoog aan wax dileyn, laakiin waxay noqon kartaa mid dilaa ah xaaladaha qaarkood.

##### **C. Waafaqsan Xeerka iyo Tababarka**

Saraakiishu waa inay u isticmaalaan oo kaliyahub wax yeelo si aan kala sooc lahayn (non-discriminatory), waana marka aw xooggaasi macquul yahay oo uu waafaqsanyahay tababarada MPD ee hadda jira iyo xeerarka MPD ee xukuma isticmaalka xoogga (oo ay ku

jiraan dhammaan qaybaha P&P 5-300). oo ay ku jirto marka loo istimmaalo kala dirridha ama ilaalinta dadka.

#### **D. Rabshadaha Madaniga ah iyo Isku-Imaatanka**

Hubka saameynta leh waa in la istimmaalo oo kaliya inta lagu guda jiro qaska rayidka iyo isku imaatanka marka la ogolaado si waafaqsan P&P 7-805.

#### **E. Xaaladaha la istimmaalayo**

##### 1. Ku dhufashada hub wax yeeleeya

- a. Marka dhibaato la taaban kato ay jirto

Ku dhufashada hub wax yeeleeya waa in la geeyaa oo kaliya marka xooga noocaas ahi ay lagama maarmaan u tahay in laga ilaaliyo sarkaalka, la beegsadaha, ama qolo kale dhaawac jireed oo **la taaban karo** oo si ula kac ah u soo socda.

- b. Goobaha beegsiga

Saraakiishu waa in aanay si ula kac ah u istimmaalin hub wax yeelo iney qofka madaxiisa, luquanta, cunaha, wejiga, kilkilada, laf dhabarta, kelyaha, ama gumaarka qofka kaga dhuftaan marka laga reebo xoog dilaa ah oo qil loo samayn karo.

##### 2. Istimmaalka hub wax yeelo (Marka laga reebo ku dhufashada)

Qaybtani waxay khusaysaa iska riixista iyo istimmaalka kale ee la midka ah ee hubka wax yeelo taas oo aan ahayn ku dhufushada.

- a. Marka xooga noocaas ahi aw lagama maarmaan noqdo si loo ilaaliyo sarkaalka, la beegsadaha, ama qolo kale waxyeello jireed oo si ula kac ah u wajoho.

ama

- b. La beegsadayaasha sida fir-fircooni uga-hortagaya haddii isku dayo yar oo lagu xakameynayo ay ahaayeen ama ay u badan tahay inay noqdaan kuwo aan waxtar lahayn (sida waafaqsan qaybta P&P 5-301 ee xoogga Ujeeddada macquulka ah ee waafaqsan Xeerka, Shariga iyo Tababarka).

#### **F. Daawaynta iyo Gargaarka Caafimaadka**

1. Marka lagu daro daaweynta caadiga ah ee daaweynta ka dib istimmaalka xoogga (sida waafaqsan P&P 5-301), daawaynta qofka lagu dhuftey hub waxyeelo leh waa in lagu daraa kormeer fiiris ah meelaha ay ku taalo dhaawaca calaamadaha, marka ay habboon tahay.

2. Shaqaalaha la dhaariyay waa inay si joogto ah ula socdaan xaaladda caafimaad ee qofka lagu dhuftay hub waxyeello leh ilaa lagu wareejiyo shaqaalaha caafimaadka ama kuwa kale ee sharci fulinta.

DRAFT